

SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA  
(C C F GENERAL TRADING COMPANY "Import & Export")



MUQDISHO-SOOMAALIYA



SAXIIXA MILKIILAYAASHA SHIRKADDA C C F GENERAL TRADING COMPANY IMPORT & EXPORT

Abdulkadir Osman Farah

Abdifitah Osman Farah



SHIRKADDA C C F GENERAL TRADING COMPANY



**UJEEEDO:- DHISID SHARCI SHIRKADDA C.C.F GENERAL TRADING COMPANY "Import & Export"**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **01/03/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanahaan hoos ku Xusan:-

.1-ABDULKADIR OSMAN FARAH, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport.I.r. P00738513. Ahna Gudoomiyaha Shirkadda.

2-ABDIFATAH OSMAN FARAH, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Warqada Sugnaanta.I.r 0134449 Kana soo baxday D/hoose Ee Muqdisho Ahna G.kuxigenka Shirkadda.

Mudanayaasha kor ku xusan ayaga oo caafimaad qaba, caqligooduna taam yahay, cid heshiiskaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxey i weeydisteen in aan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

**QODOBKA 1-AAD**

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA**

MAGACA SHIRKADDA (C C F GENERAL TRADING COMPANY "Import & Export")



**QODOBKA 2-AAD**

**MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA**

Mudada Shirkaddu ay jirayso waa muddo 100 sano ah oo laga bilaabo malinta qoralkaan la canshuuro laguna qoro buugga Shirkaddaha Maxkamada Gobolka Banaadir, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi'in karaa waa haddii loo baahdo.

**QODOBKA 3-AAD**

**RAA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.**

- Raa'sumaalka Shirkadda waa \$200,000 (Laba boqol oo kun oo dolarka Marekanka). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda waa la kordhinkaraa ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.

MAGACA	LACGTA	BOQOLEY
ABDULKADIR OSMAN FARAH	\$150,000	75%
ABDIFATAH OSMAN FARAH	\$50,000	25%
TOTEL:-	\$200,000	100%

**QODOBKA 4-AAD**

**UJEEEDADA SHIRKADDA**

- Ka ganacsiga Dharka Ragga iyo Dumarka.
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon durufaha dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadato dhisidda dhacaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ka faa'iidayaan Bulshada qeybaheeda kala duwan.



## **QODOBKA 5-AAD**

### **XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta Shirkadda waa magaalada Muqdisho Ee caasimadda Soomaaliya, waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.

## **QODOBKA 6-AAD**

### **XISAABTA SOCOTA EE SHIRKADDA**

Waxaa xisaabta socota ee shirkadda la xirayaa bisha Sako ee sanad walba.

## **QODOBKA 7-AAD**

### **FAA'IIDADA IYO QASAARAH SHIRKADDA**

Faa'iidada ama qasaaraha shirkadda waxaa loo qeybsanayaa qeybo isla'eg oo la xiriira qofku saamiga uu ku leeyahay shirkadda.

## **QODOBKA 8-AAD**

### **MALKIILAYAASHA SHIRKADDA**

Gudoomiyaha Shirkadda Waa ABDULKADIR OSMAN FARAH Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda iyo kutasarufka hantida Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkadda Rahana Gelin Karo Hantida Shirkadda , Kana Saari Karo Una Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkadda Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkadda, Sidoo kale G.kuxigenka ABDIFATAH OSMAN FARAH, Waxuuna Awood Buuxda U Leeyahay Maamulka Guud Ee Shirkadda iyo kutasarufka hantida Shirkadda, Sida In Uu Lacag Ku Shubi Karo Kana Saari Karo Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karo Jeegaga Shirkadda Rahana Gelin Karo Hantida Shirkadda , Kana Saari Karo Una Soo Gadi Karo Una Soo Iibin Karo Shirkadda Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karo Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkadda .

## **QODOBKA 9-AAD**

### **TIRADA DADKA AA'SAASAH SHIRKADDA**

- Shirkadda waxaa aa'saasay 2, qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay 2 xub nood oo ah milkiila yaasha ah, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aa saasayaasha shirkadda. Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.



**QODOBKA 10-AAD**  
**FADHIYADA HOW-WADEENNADA SHIRKADDA**

Fadhiga How-wadeenada shirkadda waxaa isugu yeeri karaa Guddoomiyaha shirkadda iyo ciddii kale ee uu u idmado waana in lugu war galiyaa xubnaha shirkadda 07 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo loona sii cayimo oo loo sii sheego.

**QODOBKA 11-AAD**  
**CODKA SAAMILEEYDA**

Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.

**QODOBKA 12-AAD**  
**ISTICMAALIDDA ASTAANTA SHIRKADDA**

Astaanta Guud ee Shirkadda waa Astaanta kor ku dheggan wixii aan loo isticmaalin waxaa loo arkayaa inaysan ka tarjumeyn shirkadda.

**QODOBKA 13-AAD**  
**XUBINTII GEERIYOOTA**

Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.

**QODOBKA 14-AAD**  
**KABIXITAANKA SHIRKADDA**

- 1-Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- 2-Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- 3-Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- 4-Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

**QODOBKA 15**  
**HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY**  
**15 QODOB 1 COVER , 5 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.**

SAXIIXA MILKIILAYAASHA

1- ABDULKADIR OSMAN FARAH

*Abdulkadir*

2- ABDIFATAH OSMAN FARAH

*Abdifatah*

( XAFIISKA NOOTAAYAHA )

REP.600/T.P.N/22, Tr. 01/03/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruuca madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana ay wada saxiixen milkiilayasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyada in ay yihiin ku wii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyada kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

*Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"*



Computer Serial #  
0134449



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO  
MUNICIPALITY OF MOGADISHU  
**WARQADDA SUGNAANTA**  
(Certificate of Identity confirmation)



**DUQA MAGAALDA MUQDISHO WUXUU CADDEYNAYAA IN SAWIIRKA IYO SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QUFKA HOOS KU XUSAN:**

*(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears hereon has the following details:)*

<b>MAGACA</b> Full Name	<b>ABDIFATAH OSMAN FARAH</b>
<b>TAARIKHDA DHALASHADA</b> Date of Birth	01-Jan-1994
<b>GOOBTA DHALASHADA</b> Place of Birth	HOBYO
<b>NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA</b> ID Number	0134449
<b>JINSI</b> Gender	Male
<b>XAALADA GUURKA</b> Marital Status	Married
<b>DEGGAN</b> Address	Dayniile
<b>MAGACA HOYADA</b> Mother's Full Names	SACIIDO MUXUMUD CILMI
<b>TARIKHDA LA BIXIYEY</b> Date of Issue	15-Sep-2020
<b>SHAQADA</b> Occupation	XOOGASADE



Right Thumb Print



**Duqa Magaalada ee Muqdisho**  
Mayor of Mogadishu  
**Cumar Maxamuud Maxamed**

*(Signature of Cumar Maxamuud Maxamed)*

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA  
Wasaaradda Ganacsiga iyo  
Warshadaha



جمهورية الصومال الفيدرالية  
وزارة التجارة والصناعة

RUQSADHA GAARKA AH IYO ADEEGYADA  
DIIWAAN GELINTA SHAHAADADA GANACSIGA

EXPORT AND IMPORT PERMIT  
BUSINESS CERTIFICATE REGISTRATION

Export and Import LICENSE A + B

Waqtiga la diiwangaliyey/Reg Date: 22/ 07 /2018

Shati No: **WGWI/061273/LD-18**



WAXAY CADDEYNAYSAA IN

Magaca Shirkadda : **C.C.F GENERAL TRADING CO.**

Shaqada uu qabanayo : **SOO DEJINTA DHARKA IYO BAGAASHKA**

Taariikhda la bixiyay... 22/ 07 / 2018 Taariikhda ay dhacayso... 21/07/2019

Wasaaradda Ganacsiga iyo warshadaha ay u diiwaangelisay in uu yahay ganacsigaani mid waafaqsan Qodobka 3-aad sharci No:8 soona baxay Oktoobar, 1964 Ganacsiga Dibadda.

Diiwaangelintaan waxaa loo cuskaday Qodobka 1-aad farqadiisa 4-5 iyo 6 ee sharci wasaaradeed No. 204 soona baxay 26 September 1964 ee xeerka Dhaqdhaqaaqa Ganacsiga Dibadda.

THIS IS TO CERTIFY THAT

Company / Name: **C.C.F GENERAL TRADING CO.**

License activities: **IMPORT**

Issue Date: 22/ 07 / 2018

Expiry Date: 21/07/2019

Is registered as foreign trader with the Ministry of commerce and Industry in terms of article 3 of law No: 8 of 29 October 1964 on foreign Economic Transactions.

This registration is subject of the provisions of article No. 1, paragraphs 4-5 and 6 of ministerial decree No.204 of 26 September, 1964 on the regulation of foreign Economic Transactions.

Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha  
(The Minister of Commerce and Industry).

**Mohamed Abdi Hayir (Maareeye)**





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA  
WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADaha

*0186000000*

Public

CODSI SAMAYN RUQSAD GANACSI WARSHAD **0581**

S. No.:

Tr.: 22/07/2018

Ku: Shirkadda **BEDER PRINTING HOUSE**

waxaan ka codsanaynaa shirkadda BEDER PRINTING HOUSE in ay ruqsad ganacsi u daabacdo Shirkadda faafaahinta xogteedu hoos ku qorantahay:

Nooca Shatiga: SOD DEJINTA IYO DHOOFIN

Magaca Shirkadda: C.L.F GENERAL TRADING CO.

Shati Number: 061273

Nooca Ganacsiga: SOD DEJINTA DHARKA IYO BACAASHKA

Waqtiga la diiwaan galiyey: 22/07/2018

Taariikhda uu soo baxay Shatiga: 22/07/2018

Taariikhda uu dhacayo: 27/07/20

Agaasimaha waaxda Warshadaha

*[Signature]*

*Fileer*

*16*



Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya

Kafiska Banaadir

Banadir Notary Public

Mogadisho-soomaliya

Mogadisho- Somalia

Xeer hoosaadka shirkadda C.C.F.General Trading Co.

MOGADISHU-SOMALIA

Cusbanneysim 2016

Waxye  
Gudoomiye  
22/07/2016

KSA/AM/pteer  
22/9/2016

XAFISKA NOOTAAYO BANAADIR  
BANAADIR NOTARY PUBLIC

Tel: +252-61-5598999/ +252-61-5592861/ +252-61-5265577

E-mail Address: [timoos114@hotmail.com](mailto:timoos114@hotmail.com) / [gaani2001@hotmail.com](mailto:gaani2001@hotmail.com)

HQ office Mogadisho, Somalia

Page 1

Ujeeddo: qoraal lagu dhisayo Shirkadda magaceeda la yiraahdo C.C.F.General Trading Co.

Muqdisho maanta oo ay tr. 08/09/2016 Aniga oo ah Dr: C/raxmaan Maxamuud Cali (timacadde) Xafiis nootaayo ku leh degmada wadajir agagaarka KM4 lehna sharciyadda nootaayada magaceedu kor ku qoran yahay waxaa marag la'aan horteyda yimid

1. C/gaadir Cismaan Faarax Soomaalia ah, ina Saciido Maxamuud, ku dhashay Muqdisho sanadkii 1975-tii degan Muqdisho, lehna Passpordka No:P00273677 ee warqaddan ku lifaaqan.

kaasoo Anigu nootaayo ahaan aan aqoonsaday habsaday in magacaas la yiraahdo sida ku cad passport-kiisa, waxayna iga codsaday in aan u qoro xeer shirkadeed (Company Law). Waana sidaan xeerku:

### Qaybta 1aad

#### ❖ Magaca, Saldhiga, Ujeedada iyo muddadda jiritaanka Shirkadda

- 1) Waxaa La dhisay Shirkada la magac baxday C.C.F. General Trading Co.
- 2) Saldhigga shirkadda waa muqdisho, shirkaddu waxay laamo iyo xafiisyo kale ka furan kartaa gobolada kale ee Dalka.
- 3) Ujedda shirkadda waa ganacsiga Guud & dhoofinta & soo dajinta.
- 4) Muddadda jiritaanka shirkadda waa 50-sano, mudadaas iyada ah haddii Milkiilaha shirkadda uu rabo waa la kordhin karaa waana la yareyn karaa inta aan la gaarina waa la baabi'in karaa.

## Qaybta 2aad

### ❖ Maaliyadda shirkadda

1) Maaliyadda shirkadu waa \$200,000 (laba boqol oo kun dollar).

tiro	Magaca	Heerka shaqo	Maaliyadiisa	boqolkiiba
1.	<u>C/qaadir Cismaan Faarax</u>	Owner	\$200,000.	100%
<b>TOTAL</b>			<b>\$200,000</b>	<b>100%</b>

2) Waxaa la kordhin karaa mulkilyaasha markii oggolaasho laga helo mulkiilaha shirkadda.

## Qaybta 3aad

### ❖ Shirka guud ee shirkadda

- 1) shirka guud waxaa wici kara gudoomiyaha waxaana shirka lagu qabanayaa meeshii uu tilmaamo, Ogeysiiska Fadhiyadda la isugu yeerayo waa in ay ku cad yihiin, Maalinta, Saacadda, Meesha fadhigga lagu qabanayo iyo arrimaha laga hadlayo, ogeysiiskaas oo sidaas u dhigan waa in gudoomiyaha shirkadda u diraa shaqaalaha shirkadda laguna gaarsiiyo warqad qoraal ah ugu yaraan 15-maalmood ka hor maalinta shirka la qabanayo qofkii jooga dalka guddihiisa, kan dibadda ku maqana 30-maalmood ka hor inta aan shirka la qaban.
- 2) Shirka guud ee shirkadda waxaa gudoominaya Gudoomiyaha Shirkadda ama Maamule idman.
- 3) Shirarku waa kuwo caadi ah iyo mid aan caadi ahayn
- 4) Go'aanadda ka soo baxa shirarkaas la fariisto waa in lagu qoraa buug u gaar ah waxaana qoraya xog-haye, waxaana qoraalkaas wada saxiixaya gudoomiyaha iyo xog-hayaha shirka haddii xoghayaha shirka uu noqdo Nootaayo qoraalkaas waxaa saxiixaya gudoomiyaha iyo nootaayaha waana in ay ku cad yihiin qoraalkaas doodii shirka iyo go'aankii la gaarey,

## Qaybta 4aad

### ❖ Gudoomiyaha ama Keli maamulaha idman

- 1) Shirkadda waxaa Maamulaya Mulkiilaha ama keli maamule idman waxayna Awood buuxda u leeyihiin in ay sameeyaan wax alle iyo wixii ku saabsan maamulka caadiga ah ee shirkadda.
- 2) Haddii hal xubin oo ka mid ah Maamulka uu xilkiisa ka dhaco, sababkasta ha ku timaadee waa in si deg deg ah shir guud ee ka kooban shaqaalaha shirkadda la isugu yeeraa si loo magacaabo xubintaas bedelkeeda.
- 3) Xubnaha guddigga maamulka iyo keli maamulaha idman waxay xaq u leeyihiin in loo celiyaa kharashka kaga baxa danaha iyo shaqada shirkadda. Gunnada la siinayo guddigga maamulka ama keli maamulaha idman waxaa xadidaya shirka guud ee mulkiilaha shirkadda.

## Qaybta 5aad

### ❖ Awooda gudoomiyaha shirkadda

- 1) Waa hogaamiyaha, hagaha, socodsiiyaha hawlaha shirkadda.
- 2) Wuxuu awood u leeyahay in uu isugu yeero shirarka caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn.
- 3) Waa kormeeraha dhamaan hawlaha shirkada.
- 4) Wuxuu awood u leeyahay in uu si ku meel gaar ah shaqada uga joojiyo agaasimayaasha waaxyaha iyo Shaqaalaha Muhiimka ah.
- 5) Wuxuu awood u leeyahay in uu cid kale shaqada si ku meel gaar ah ugu sii magacaabo mudo kooban.

## Qaybta 6aad

### ❖ Mudada xilka gudoomiyaha

- 1) Mudada xilka gudoomiyaha waa 2-sano dibna waa loo dooran karaa.
- 2) Haddii ay gudoomiyaha ku timaado xil gudasho la'aan sababkasta ha ku dhacdee waxaa shaqada sii wedaya Maamulaha guud ugu badnaan mudo bil ah kadibna waxaa leysugu yeerayaa shaqalaha shirkadda si gudoomiye cusub loo doorto.

XAFIISKA NOOTAAYO BANAADIR  
BANAADIR NOTARY PUBLIC

Tel: +252-61-5598999/ +252-61-5592861/ +252-61-5265577

E-mail Address: [timoos114@hotmail.com](mailto:timoos114@hotmail.com) / [gaani2001@hotmail.com](mailto:gaani2001@hotmail.com)

HQ office Mogadisho, Somalia

### Qaybta 7aad

#### ❖ Guddigga barista xisaabaadka Shirkadda

- 1) Guddigga barista xisaabaadka shirkadda waxay ku shaqeynayaan sharciga xisaabaadka caalamka oo casri ah.

### Qaybta 8aad

#### ❖ Miisaaniyadda shirkadda

- 1) Sannad waliba marka la gaaro 31 Decenbar, guddigga maamulka ama Keli maamulaha idman waa in ay soo diyaariyaan Miisaaniyadda sanadkii tegey. qoraaladda miisaaniyadda waa in ay ku cad yihiin Faa'iidada, Khasaaraha isla markaasna lagu soo tifaftiro xaaladda ay ku sugan tahay hantida shirkadda.  
Warbixinadda guddigga maamulka iyo kan baarista ay soo qorayaan waa in ay xisaabta miisaaniyadda la socdaan.

### Qaybta 9.aad

#### ❖ Baabi'inta shirkadda iyo Bedelaada Xeerka

- 1) Haddii la damco in shirkadda la baabi'iydo sababkasta ha ku timaadee shirka guud ee shirkadda waxaa lagu magacaabayaa hal ama labo nin oo xira xisaabta guud ee shirkadda.
- 2) Wax allaale iyo wixii aan halkaan ku qorneyn waxaa loo raacayaa sida uu qabo Sharcigga Islaamka & Xeerarka J.F.S. ee quseeya shirkadaha noocan ah.

Saxiixa mulkiilaha Shirkadda

1. C/gaadir Cismaan Fraarax

Xafiiska Nootaayadda Banaadir

Dr. C/raxmaan M. Ali (Timacadde)

XAFIISKA NOOTAAYO BANAADIR

BANAADIR NOTARY PUBLIC

Tel: +252-61-5598999/ +252-61-5592861/ +252-61-5265577

E-mail Address: [timoos114@hotmail.com](mailto:timoos114@hotmail.com) / [gaani2001@hotmail.com](mailto:gaani2001@hotmail.com)

HQ office Mogadisho, Somalia





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha

Foomka Diiwaangelinta Shirkadaha Ganacsiga

RE.S.NO. \_\_\_\_\_

Taariikh: \_\_\_\_/\_\_\_\_/2018

Magaca Shirkadda Company Name	C. C. F. GENERAL TRADING COMPANY				
Nooca Shirkadda Type of trade	Cabirka Size	Dhoofin/SooDejin Export & import	Ruqsad Gaar ah Special permit	Adeeg Service	Waqtiga La aasaasay Shirkadda Established date of company
		✓			
Ciwaanka Shirkadda Address	Xarunta Shirkadda Location	Teleefon Tell	E-mail		
	Bakara	015547082	c/fgadiraosman@gmail.com		
Dalka Domestic	Dalka	Lawada leeyahay Dal & Dibad Joint-venture			
Dibada Foreign		Dowladda Public			
Magaca Qofka Lagala Xiriiraayo Contact person's name	algadiraosman farax		Numberka Wakiilka Shirkadda Contact person's phone number		
			0159193		
Tirada Shaqaalaha Number of employee	Lab Male	2	Dhedig Female	0	Wadarta Total
					2
<b>U GAAR AH WAAXDA GANACSIGA</b>					
Xogta Shattiga License information	Numberka Shattiga License number	Waqtiga la Bixiyey Issued date	Waqtiga uu dhacayo Expire date	Xaaladda status	
Tixraaca.W.L.Q p.v. No.					
Cadadka Lacagta Amount	\$ 3000				
Faallo remarks					

Madaxa diiwaangelinta

Registration office

Wakiilka Shirkadda

Owner/Representative

A



Xaashida Sare ORIGINAL

a

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA  
XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

No. 757949  
Lacag Qabasho Guud  
(GENERAL RECEIPT)

Meesha W. Ganaarsiga Wayshada Taariikh 22/07/2018  
Waxaa laga qabtay C.C.I General Trading Company  
Lacag dhan Sh. Sh 300 (Sedex boqol oo dollar)  
Oo ah License

22-Jul-2018

FAAHFAAHIN

Madaxa	M-xige	Sh.	Sent
<u>11000</u>	<u>11111111</u>	<u>Sh 300</u>	<u>00</u>
<u>Waxaa laga qabtay</u>			
<u>Shirkadda C.C.I</u>			
<u>Bennar</u>			
<u>Shaxiixa lacag qabta</u>		<u>Sh 300</u>	<u>00</u>
<u>Jagada</u>			

32 - Other manufacturing

USD

Amount

300.00

Total : 300.00

Dhibaha Lacagta - Original  
Xis-Guud Dawladda - 2nd COPY  
Buugga Ayuu ku Harayaa 3rd COPY


Created By: A

Signature: E/Z


Taariikh: 25/07/2018

MAGACA SHIRKADDA	MHUSEEN INTERNATIONAL TRDE LTD .COM
SHAQADA UU QABANAYO	C.C.F GENERAL TRADING CO.
NOOCA SHATIGA	SOO DEJIN
SHATI NAMBARKA	061273/LD
LACAGTA	\$300
WAQTIGA UU SOO BAXAY	23/07/2018
WAQTIGA UU DHACAYO	22/07/2019
ADDRESS SHIRKADDA	TEL:0615542082 EMAIL:C/QAADIROSMAN @GMAIL.COM

Agaasimaha W/Ganacsiga



Agaasimaha Guud





**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 01/03/2023**

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Abdulkadir Osman Farah** oo ka Wakiil ah Loo Caddeeye **C/fitaax Cismaan Faarax Shirkadda CCF General Trading Company import and export** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 600/W.P.N/23, Tr. 01/03/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca Loo Caddeeyaha</b>	C/fitaax Cismaan Faarax Shirkadda CCF General Trading Company import and export
<b>Taariikhda Caddeynta</b>	01/03/2023

**Wakiilka Loo Caddeeye:** Aniga oo ah **Abdulkadir Osman Farah**, Leh Tel No. **0612222230**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **C/fitaax Cismaan Faarax Shirkadda CCF General Trading Company import and export**.



**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Maxamed Cabdi Cali**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**Abdulkadir Osman Farah**